NHS
North West London
Collaboration of
Clinical Commissioning Groups

Hergab – Dhabta ka dambeeysa sheekada hergabka.

Waxaa jiro sheekooyin badan oo laisla dhexmaraayo sanadkaan oo ku saabsan hergabka. Dhabta ka dambeeysa sheekooyinka inta badan laisla dhex maro.

War beenad: laguma badbaadayo in talaalka hergabka laga qaato hayada cafimaadka ee marka magacooda lasoo gaabiyo loo yaqaano (NHS) ta.

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa) #1: Hayada cafimaadka ee marka magaceeda lasoo gaabiyo loo yaqaano NHS waxay qaaday tilaabo kasta oo laguugu badbaadin karo waxayna sida oo kale sameeysay qorshe xoogan oo dadka lagu duraayo talaalka hergabka ayada oo qofka lagu talaali doono goob ka badbaadsan xanuunka COVID. Hadaba hadii laguu soo diro balan talaal hergab ah waxaa munaasib ama muhiim ah in aad timaado. Waxa aad iyo aad uu badbaado badan inaad isdurto talaalka halka aad diidi lahayd.

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa) #2: Waxaay cirbada talaalka sameeyn Qatar ah ku yeelataa milyankiiba hal qof. Sameeyn khafiif oo caadi ah ayeey leedahay, kaas oo sameeyntiisa ay ka yartahay tan laga qaado hergabka maxaa yeelay hergabka wuxuu keeni karaa xanuun Qatar ah ama dhimasho. Cirbada talaalka waxay badbaado utahay adiga iyo inta kaa ak dhow.

War benaad: Cirbada talaalka maaha mid xalaal ah

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa) #3: Waxaa keli oo uu subaga dofaarka ku jiraa talaalka caruurta sanka looga buufiyo. Hayada islaamka uqabilsan wadankaan Ingiriska ayaa ogolaatay in caruurta sanka looga buufin karo talaalkan. Waxa sida oo kale jiro mid kale oo loogu bedeli karo caruurta lakin waa in aad ka codsataa dhakhtar xafadeedka lo yaqaano (GP) ga.

War benaad: Cirbada talaalka waxa ku jiro kaar ay korkaaga ku rebeeyso si dhadhaqaga loola socdo.

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa) #4: Hada ka hor ayaa barta aaladaha bulshada lasoo dhigay laguna arkay fidiyoow oo hada laga tiray barta aaladaha bulshada kaas oo lagu arkay dad karkaas loo gelinaayo. Fidiyoowgaas waxaa lahaa kambuni mareeykan ah wuxuna ugu talo galay in shaqalahiisa uu ugeliyo kaarkaas faraha hore si ay ugu gataan cunto fudud ama ay ugu isticmaalan makiinadaha sida kombutarada iyo fotokoobiyada. Kani ma uusan ahayn fidiyoow loogu talo galay cirbada hergabka sida daradeed cirbada talaalka hergabka ma wadato wax kaar ah.

War Benaad: Crbada talaalka hergabka ayada ayaaba hergab laga qadaa.

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa) #5: Hergab kama qaadi kartiti cirbada talaalka hergabka. Cirbada waxay wadataa jeermis dilan kaas oo aan laga qaadi Karin hergab. Waxa laga yaaba in ay kuugu yeelato sameeyn yar sida xanuun korka, murqo xanuun, qandho yar,

ama lalabo, dhaxan iyo daal. Intaan oo dhan waxay qatartooda ka yartahay qatarta uu leeyahay hergabka.

War benaad: Cirbada talaalka ayaa waxaay keeni kartaa in lagaa helo xanuunka COVID-19

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa)#6: Cirbada talaalka hergabka raad kuma yeelaneeyso wax ku saabsan koronofayras. Baaritaanka koronofayras wuxuu jirka ka raadin fayraas loo yaqaano SARS-CoV-2 **kaas oo ka duwan kan hergabka**. Hergabka jeermiskiisa waa mid ka duwan kan koronofayraska. Waxa dhab ah in cirbada talaalka hergabka ay sameeyn ku yeelanayn jawabta baaritaanka COVID-19.

War benaad: Cirbada talaalka hergabka laf ahaanteeda ayaa ah mid halis keeni karto.

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa)#7: Cirbada talaalka hergabka waa mid badbaado leh sida oo kale sameeyn wanagsan leh wana in la qaadata sanadkiiba mar. Hergab kuuguma ridi karto. Kamana badbaadin karto xanuunka koronofayraaska lakin waxay sanadkaan ka badbaadineeysa waxyaalaha hergabka keeno ee ku dhex wareego hawada.

War benaad: Cirbada talaalka hergabka waxaa ku jiro xanuunka koronofayraaska (COVID-19)

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa)#8: Waxa jiro war benaad lala dhex waregayeey barta aladaha bulshada oo lagu shegaayo in cirbada talaalka hergabka laga qadaayo koronofayraas (COVID-19). Cirbada talaalka hergabka waxa la isticmalayeey sanadyo badan mana laha fayraaska loo yaqaano SARS-CoV-2 kaas oo ah fayraas cusub oo keeno koronofayraas (COVID-19).

War benaad: Talaalka caruurta ee sanka lagu buufiyo waxay canuga ku rideeysa lalabo iyo xanuun.

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa)#9: Dawada talaalka ee sanka lagu buufiyo waxa laga yaaba in ay sanka xirto ama ay keento diif, madax xanuun, daal iyo in cunto cunida ay ku yaraato canuga. Lakin calamadahaan iyo xanuunyadaan oo dhan waxaay soo ciribtirmayaan labo malmood gudahood waxayna qatartooda ka yartahay tan ka dhalan karto hergabka.

War benaad: Hergabka caruurta waxba kama dhibo sida daradeed waxa wanagsan in uu ku dhaco

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa)#10: Hergabka caruurta ku dhaco wuxuu keeni karaa qatar – wuxuu sababi karaa qandho fara badan, dhegaha oo xanuun la bukoodo, burunkiito feeraha ah ama xanuun sambabada ah kuwaas oo sababi karo in canuga isbitaal la dhigo. Hadaba ogoloow in canugaaga la siiyo talaalka si ay ugu caawiso ka hortaga hergabka, asaga iyo qoysaska liita iyo saaxibada intaba. **http://bit.ly/child-flu**

War benaad: Talaalka sanka lagu buufiyo wuxuu caruurta uu keeni karaa dhimanaansho ama canuga oo hadalka ku xirmo (autism)

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa) #11: Waxaa hubaal ah in buufiska talaalka ee sanka caruurta looga buufiyo uusan kenayn wax ku saabsan dhimanaansho xaga maskaxda ah. Waxaa in badan la beniyeey in talaalka jadeecada, qanjir bararka iyo jadeecada Jarmalka (MMR) ay keeni karaan dhimanaansho. Hadaba waxa hubaal ah in aysan jirin dhimanaanshaha maskaxda oo ay keeni karto talaalka buufiska caruurta ee hergabka. Warbixin dheeri ah waxaad ka heli kartaa: https://www.nhs.uk/news/medication/no-link-between-mmr-and-autism-major-study-finds/

War benaad: Talaalka buufiska caruurta waxay caruurta ku ridi kartaa xanuunka koronofayraas (Covid)

War dabool ka qaadid (Warka runtiisa)#12: Talaalka buufiska sanka waxaa la isticmalayeey mudo sanadyaal ah wax lug ahna kuma laha SARS-CoV-2 oo laga qaado xanuunka koronofayraas (COVID-19). Waxaa hubaal ah in canuugaaga uusan buufiska talaalka ka qadeeyn xanuunka covid-19.